



**Guddida Caafimaadka Degmeda
Caafimaadka Dadweynaha**

Ka Qaashada Dawooyinkaaga Farmashiyaha

Markaad Dhakhtar arkaysoba sii qaado daawooyinkaaga si aad Dhakhtarka u tusto.

Sida dawooyinka kuu qoran aad uga helayso Farmashiyaha

- ◆ Dhakhtarku wuxu ku siinayaa foom dawooyin ku qoranyihiin foomkaas ayaa la yiraahdaa rijeeto.
- ◆ Tag Farmashiyaha aad doonto
- ◆ Sii qaado
 1. Rijeetada
 2. Kaadhka Adeegga Dadweynaha
 3. Lacagta Daawada
- ◆ U dhiib rijeetada qofka miiska jooga
- ◆ Tus kaadhkaaga Adeegga Dadweynaha
- ◆ Weydii waqtiga uu diyaarinayo dawooyinka

Marka dawooyinkaagu diyaar yihiin

- ◆ Sheeg magacaaga
- ◆ Weydiiso dawooyinkaagii
- ◆ Farmashiistuhu wuxu kuu sharxayaa waqtiyada aad dawooyinka qaadanayso iyo habka aad u qaadanayso.
- ◆ Weydii su'aal haddaad qabto
- ◆ Bixi lacagta daawada

Haddii aanad awoodin lacagta daawada weydii Farmashiistaha inuu waco Dhakhtarkaagii oo uu weydiyo hadduu jiro hab ka jaban

Qiimaha dawada

- ◆ Qiimaha caadiga ah ee dawadu waa \$3.00 haddii aad haysato kaadhka adeegga Dadweynaha laakiin kuwo intaa ka badanina way jiraan.
- ◆ Carruurta da'doodu 6 sano ka yartahay daawadooda badankeedu waa lacagla'aan.
- ◆ Haddii aanad haysan kaadhka adeegga dadweynaha qiimaha daawadu wuxu noqonayaa \$15.00 halkii dawoba

Dawada waqtiga dheer la isticmaalayo

- ◆ Haddii aad u baahantahay dawo waqtidheer ah, masaal ahaan dawada kaadi macaanka, ama, sonkorowga Dhakhtarka ayaa kuu qoraya saddex bilood dawadood.
- ◆ Farmashiistuhu wuxu ku siinayaa bisha ugu horeysa dawadeeda.
- ◆ Inta aanay dawadu kaa dhammaan u gee Farmashiistaha dhalada ama baakada dawada si aad uga soo qaadato bisha labaad dawadeeda, bisha saddexaadna yeel sidaas oo kale.
- ◆ Baakada waxa dusha uga qoknaandoona ku cesho haddii dawo dheeraad ah inaad qaadato ay tahay.
- ◆ Sida caadiga ah waxad lacag ka bixinaysaa bisha ugu horreysa oo keli ah. Bisha labaad iyo tan saddexaad dawadoodu wa lacagla'aan.

Kaadhka Caafimaadka Isticmaalka Sare

- ◆ Kaadhka Caafimaadka Isticmaalka Sare wuxu xaq u siiyaa dadka dhakhtarka badanaa ku soo noqnoqda iyo daawadaba qiime jaban.
- ◆ Dhakhtarkaaga ayaa kuu dalbikara Kaadhka Caafimaadka Isticmaalka Sare haddii, aad dhakhtarka la tashi ugu tagto 12 jeer ama ka badan sannadkii taasoo la xiriirta dhibaato Caafimaad oo Socota.
- ◆ Haddii arjiga la ogolaado Kaadhka Caafimaadka Isticmaalka Sare ayaa lagu soo dirayaa.
- ◆ Kaadhku wuxu shaqaynayaa sannad kadibna dhakhtarka ayaa mid cusub kuu dalbaya.

